CABASHO A QABTAA JARAA'IDKA IYO MAAGAZIINADA UK?

Hadii aad ka cabaneyso sheeko lagu qorey jariidad ama maagaziine lagu daabacey UK oo aad xal ka weydey tafatiraha masuulka ka ah jariidaa, gudida cabashooyinka ayaa ku caawinkarta. Qoraal ayey daabacaan ku sharaxaya habka aad cabashadaada ugu gudbin karto waxaaney kuu sameyndoonaan baadhitaan cabashadaada ku saabsan maqaalka la daabacey iyaga oo cuskanaya habka sharcigu ugu tala galey iney u dhaqmaan. Labada qoraalba waxa ay ku qoranyihiin af ingiriisi, markaa hadii aad u bahato in lagaa caawiyo turjumaada la xdhiidh xarunta komyuunitigaaga somali

Gudida waxa ay leeyihiin Website www.pcc.org.uk iyo telifoon lagugu caawinkaro 0845 600 2757 labad wuu heli karaa qofka af ingiriisiga ku hadla

Gudida cabashada saxaafadda waxa loo xil saarey meel marinta hab sharciyeedka ay soo sameeyeen jara'idka iyo qoraalada kale oo ay ansaxiyeen gudida ka cabashada jaraa'idku. Sharcigaasu waxa u saameeyaa afar qeybood: waxa la qorey iney sax yihiin, in qofka danahiisa shakhsiga ah la fara geliyey,habka warka loo soo ururiyey iyo in la ilaaliyo danaha dadka aan laheyn awooday isku daafacaan ee wax yeelo ka soo gaadhey sharci daro ku lug le takoorid (midab iyo wax la mid ah). Gudidu waxa ay wax ka qabandoontaa cabashooyinka hoos imanaya sharcigooda ee saameynaya jaraa'id ama qoraalo guud ahaan lagu talogaley dadka UK kuwaas oo ay ku jiraan somali. Laakiin baadhitaanka cabashadaasu ay ku soo bixi af ingiriisi

Su'aalahaaga oo laga jawaabey

Halkan waxa ku qoran su'aalaha badi nala soo weydiiyo. Hadii kuwo kale aad heyso aad ayaanu diyaar u nahey inaanu kaa caawinno.

S. Garsooraha (looyarka) kharashkiisu waa imisa? Garsoore (looyar) miyaan u baahanahey?

J. Wax kharash ah kuuguma fadhido- oo ann aheyn tigitka warqada aad soo direyso. Shaqada aanu qabaneyna waa lacag la'aan. Uma baahnid Looyar inuu cabashadada gudbiyo.

S. Toos uguma jiro sheekada. Ma caban karaa?

J. Gudida cabashaa saxafaddu (PCC) waxa ay eegi doontaa oo keliya dadka arrintu ay ka cabanayaan ay toos ay u saameysey. Mararka qaar waxa ay gudidu dhegeysankartaa, iyada oo khasab aaney ku aheyn, dad aaney arrintu toos u khuseyn- waa hadii ay bulshada aad u daneyneyso oo keliya.

S. Sidii ugu dhakhso badan ee cabasho aan u gudbin karaa?

J. Waxaanu badi aqbalnaa cabashooyinka naloo soo gudbiyo laba bilood daabacaadooda gudahood. Hasa yeesho e hadaad wada hadal la gasho tafatiraha jariidada markii maqaalka la daabacey oo uu ku qancinwaayo waanu aqbalidoona cabashadaada ilaa laba bilood waqtigii uu xidhiidhkiinu istaagey. Gudidu wey aqbali kartaa cabashooyin waqti intaa ka danbeeya hadii ay jirto sabab dib u dhaca keentey

S. Mudo intee leeg ayey qaadataa in cabashada wax laga qabtaa?

J. Waxa ay ku saabsantahey culeyska arrimaha. Waxa laga yaabaa iney qaadato dhowr maalmood oo keliya laakiin marka leysku celceliyo waxa ay qaadataa ilaa 35 maalmoo oo la shaqeynayo.

S. Magdhow ma heli karaa?

J. Maya hadii aad lacag raadis tahey oo aanad xal kale u raadineyn cabashadaada markaa waxaad u baahantahey xal sharci oo maxkamadaha aad marto.

S. Gudidu ma joojinkartaa maqaal intaan la daabicin ?

J. Maya. Gudidu kuma ma amrikarto jaraaidka iney maqaal joojiyaan: ; hadii ay taa ku dhaaaqaan waxey ku xad gudbeysaa xaqa xoriyadda jaraaidka iyo qoraalada kale.

Hadii aad aaminsantahey in maqaaladi ay jebisey sharciga jaraaidaka toos ula xidiidh tafatiraha jariidada oo u sheeg cabashadaada. Gudida cabashada jaraaidk waxa ay diyaar u yihiinin iney kaa caawiyaan waxa aad ka werwersatahey iyaga oo cuskanaya sharcigakaana taageeraya habka aad fariintaada ugu udbineyso tafatiraha sidii ugu haboon.

S. Gudida cabashada jaraaidku (PCC) miyey la dhaqmaan dhamaan jaraaidka UK?

J. Gudidu waxey eegi kartaa badi cabashada laga laga keeno (ku dhawaad 97%) jaraaidka iyo qoraalada qanacsi ahaan loo daabaco. Mararka qaar oo aan badneyn jaraaidka ka baxsan shuruucda gudida (PCC) weli wey eegi karaaan cabashada xal u raadiyaan.

S. Gudida (PCC) awoodeedu ma gaadhaa qoraalada internetka?

J. Gudidu (PCC) wey eegi kartaa cabashooyink jaraaika iyo qoraalada waa hadii waxa la daabacey ay soo galaan habka xeerkooda qoraalkuna uu hahey mid xeerkooda hoos imanay.

S. Awooda gudida (PCC) wax ma ka qabankartaa wararka la arko ama la maqlo?

J. Gudidu (PCC) waxbey kaqaban kartaa cabashada maqal iyo sawir ama maqal hadii internetka laga helo. Sharikadaha waxa u yaal xuduudo arimahaa ku saabsab

Cabashooyinka caadiga ah ee gudida (PCC) ayaa saaeeya kuwas. Waa in la keeno cabashooyinkaa ilaa laba bilood gudahood. Qofka cabanayaa cabashadiisa waa inuu cadeeyaa isaga oo cuskanaya sharciga halkii suurta gal ah-qoraal xaqiijinaya cabashada waa inuu keenaa. Qoraal.Sida dacwadaha badidooda shaqaalaha gudidu (PCC) ayaa u jooga iney ka caawiyaan inuu sawir iyo maqal ku keeno cabashadiisa.

S. Gudidu (PCC) wax ma ka qabankarta qof iskii wax isaga daaabacdey?

J. Tijaabada gudidu (PCC) waxa ay tahey in waxa ladaabacey tafatire uu ka danbeeyo sida sharcigu uu dhigayo. Hadii lagu daabacey qolalka inernetka ama Blog cidina aaney masuul ka aheyn wuxuu debedda ka yahey sharciyada gudida (PCC)

S. Waxyaabaheen ayaaney gudida (PCC) wax ka qaban Karin?

J. lama macaamilno wixii shaci ama qandaraasyo ku lug le oo waxa qaabila maxkaadaha. Cabashooinka ku lug le xayeysiiskka , kuwa la iib gelinayo ama tartanka ah gudiyo gaar ah ayaa qaabilsan-warar dheeraad ah hadii aad u baaato waxaad ka heli kartaa telifoonkayaga caawimaada. Mararka qaar oo aan badneyn gudidu waxa ay go'aansataa inaaney cabashooyinka qaarkood eegin.

Waxa kale aanaan wax kaqaban karin arimaha la xidhiidha dabeecadda (taste) anshaxumad iyo ku xad gudubka.

PRESS COMPLAINTS COMMISSION
(GUDIDA KA CABASHADA SAXAAFADDA)
HALTON HOUSE
20/23 HOLBORN
LONDON EC1N 2JD

QEYBTA TELIFOONADA 020 7831 0022
TALO 24 SAACADOOD 07659 152656
(fariin ka tag waa lagula soo hadli doonaa-ISTICMAAL HADDI AAD BAAHANTAHEY OO KELIYA)
FAX: 020 7831 0025
EMAIL: COMPLAINTS@PCC.ORG.UK